



Sida Loo Isticmaalo 9-1-1

Wac 9-1-1 kaliya si aad u soo sheegtid xaalad nafta halis galinaysa oo u baahan boliis, gargaar caafimaad ama dab-damis oo degdeg ah. Haddii aan baahi adagi jirin ha wicin 9-1-1. Khadadka 9-1-1 waa inaan mashquul laga dhigin oo ay u furnaadaan dadka qaba arrin degdeg ah oo dhab ah.

Goorta la waco 9-1-1

- Si gargaar loogu helo qof waxyeelobay. Tusaale ahaan:
 - Haddii qof uu si culus u dhaawacan yahay.
 - Haddii aad aragtid qof ku dhaawacmay shil.
- Haddii aad aragtid qof u dhaqmaya si shaki leh, wax xadaya, ama jabsanaya guri ama dhisme.
- Haddii aad urisid qiiq ama aad aragtid dab.
- Haddii aad aragtid dad dagaalamaya oo waxyeelo isu geysanaya.
- Haddii aad aragtid qof la dhacayo ama la dilayo.
- Haddii aad aaminsan tahay in loo baahan yahay gargaar degdeg ah laakiin aanad hubin, wac 9-1-1 oo sharax xaaladda.
- Haddii aad si aan ku-talagal ahayn u wacdid 9-1-1, ha ku dhigin teleefonka. Waxa dhacay u sharax shaqaalaha 9-1-1.

Goorta aan la wicin 9-1-1

Marka ay dhacdo aafu ama masiibo dabiici ah, yaree wicitaanadaada 9-1-1 haddii aanay jirin arrin degdeg ah oo nafta halis galinaysa oo u baahan gargaar boliis, caafimaad ama dab-damis. Tilmaan-bixintan soo socota ayaa kaa caawin doonta inaad garatid goorta ay haboon tahay in la waco 9-1-1 marka masiibo jirto.

- Marna ciyaar ahaan ha wicin 9-1-1.
- Marni ha wicin 9-1-1 si aad war ama macluumaad u weydiisid.
- Marna ha wicin 9-1-1 si aad u ogaatid inay shaqeynayso.
- Iska daa teleefonka haddii aanad baahi adag u qabin wicitaan teleefon.
- Ha wicin 9-1-1 haddii aanad u baahnayn jawaab degdeg ah oo aad ka heshid boliis, dab-damiska ama shaqaalaha gurmada ee caafimaadka.
- Haddii ay kugu dhacaan noocyo kale oo ah dhibaatooyin aan khuseyn adeegyada degdegga, wac lambarka teleefon ee ku haboon adeegyada kale.

Talooyin teleefon oo kale oo ah degdegga

- Haddii aad sare u qaadid teleefonkaaga si aad wicitaan u sameystid oo aanad maqlin codka khadka (dial tone), ha isa saarin. Kaliya sug dhawr sekan, waxana aad heli doontaa codka khadka ka dibna waxa aad awoodi doontaa inaad sameysid wicitaan.
- Ma leedahay qof la xidhiidhid oo ka baxsan degmada? Marka degdeg jiro, waxa dhici karta in khadadka teleefonka ee degmadu mashquul noqdaan. Haddii aad leedahay saaxiib ama qaraabo aad wicitaan fog (long distance) ku wacdid, waxa aad awoodi doontaa inaad la xidhiidhid. Xubnaha qoyskaagu waxay isu dhaafi karaan fariimo ay ku dhaafaan qofkaas oo waxay dadka u sheegi karaan inay fiican yihiin.

Waxa la yidhaahdo marka aad wacdid 9-1-1

- Qofka u sheeg waxa dhacay ama ku haysta.
- Qofka u sheeg magacaaga, adreeskaaga iyo lambarka teleefonkaaga.
- Ha dhigin teleefonka ilaa ay kuu sheegaan inaad dhigtid; waxa laga yaabaa inay qabaan su'aalo kale oo ay ku weydiiyaan.

Caruurtaada bar isticmaalka saxda ah ee 9-1-1

- Waalidku waa inay isticmaalaan macluumaadka ku qoran warqaddan si ay caruurtooda ugala hadlaan sida iyo goorta la isticmaalo 9-1-1. Waxa sax ah oo la yaqaano waxa uu badbaadin karaa nafta dadka.

Khadadka teleefonka bane oo ha mashquulin marka degdeg jiro

- Marka degdeg jiro, adeegyada teleefonka waxa buuf-dhaafiya isticmaalka. Waxa aad gargaar ka geysan kartaa in adeegga ay helaan kuwo ugu baahida badan marka aad adigu sameysid kaliya wicitaanada lagama-maarmaanka ah. Sidoo kale, yaree isticmaalka mishiinka faakiska iyo kombiyuutarka; isticmaalkoodu waxa uu isna mashquuliyaa khadadka teleefonka.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-013
Somali